*Somaliska*

# Warbixin ku saabsan taageero-dhaqaaleed

ÖSTRA GÖINGE



## Waa maxay taageero-dhaqaaleedka?

Taageero-dhaqaaleed waa caawinaad oo kumeelgaar ah. Waaxda taageero-dhaqaaleedka ee Dowladda hoose waxay awoodda, waa haddii loo baahdo, in ay bixiso taageero-dhaqaaleed iyo hogaamin ilaa aad ka hesho isku filnaansho dhaqaaleed. Qofka degmada ku nool oo xaalad kumeelgaar ka sokoow aan awoodin isku filnaasho dhaqaaleed, wuxuu xaq ku leeyahay in uu Dowladda hoose ka codsado taageero-dhaqaaleed, waa haddii u kaalin wayn ka geysto sidii u ku heli lahaa isku filnaansho dhaqaaleed. Qofka wax barta ama ganacsade ah caadi ahaan xaq kuma laha codsashada taageero-dhaqaaleedka. Taageero-dhaqaaleedka waxay ku salaysan tahay baahida markaas jirta. Qofku wuxuu kaalmo-dhaqaaleedka codsan karaa kaddib, markii uu isku dayay in uu siyaabo kale isku biilo.

## Qofka taageero-dhaqaaleed codsanayo waa in uu:

- Noo keena dhammaan dokumentiyadaha aan ka codsanay.
- Codsado daqliyadaha iyo gunadaha kale ee uu codsan karo.
- Tixraaco qorshaha hirgalay oo u suurtagelin doono helida isku filnaansho dhaqaaleed.

## Qorshaha hirgalay

- In uu qorshe Xafiiska Shaqada kala heshiiyay oona uu shaqo raadsade yahay.
- In uu qorshe xarumaha daryeel-caafimaadeedka la galay oona xannuunkiisa ku caddayn karo warqadaha dhakhtarrada.
- In uu Dowladda hoose ka haysto qorshaha daryeelida iwm ee isaga/iyada u gaar ah.

Qofka qabo ilmo da'dooda hal sano ka wayn waa in uu, haysta goob lagu xannaanadeeyo, taasoo u suurta geli doonto in uu yeesho qorshe firfircoon.

## Sidee baa taageero-dhaqaaleedka loo codsada?

Waaxda **taageero-dhaqaaleedka waxaa lagala xiriiri karaa** khadka taleefanka oo lambarkiisu yahay 044-775 60 00. Waxaa goortaas lagu siin doonaa warbixin kooban, iyo jawaabta su`aalaha xiriirka la leh taageero-dhaqaaleedka. Gacan-hayeha wuxuu ku waydiin doonaa su`aallo ku saabsan waxa adiga/qoyskaaga aad ku mashqulsan tihiin, dhaqaalaha iyo sababta aad imminka taageero-dhaqaaleedka u codsanayso. Goortaas ayaa lagu dhaqaaqi doonaa qiimaynta ugu horeeyso ee xiriirka la leh xaq u yeelanshada qaadashada taageero-dhaqaaleed.

**Warbixin ku saabsan** taageero-dhaqaaleed, foomka lagu codsado, liiska waxyaalaha u baahan in la xasuusto iyo ballanka booqashada ayaa kaddib lagu soo diri doonaa. Xilliga booqashada waxaa muhim ah inaad noo keento dhammaan dokumentiyadaha aan ka codsanay.

Kaddib markii aan ka helno dhammaan warqadaha aan ka codsanay, ayaa waxaa bilaaban doono **baaritaankii** xiriirka la lahaa xaq u yeelanshada qaadashada taageero-dhaqaaleed. Kaddib markii baaritaanka la soo gabagabeeyo, waxaa **go´aanka** lagugu wargelin doonaa warqad boostada lagugu soo diro doono.

## Sidatan ayaa taageero-dhaqaaleedka loo xisaabiyaa

Taageero-dhaqaaleed = Heer-qarmeed noolasha + kharashyadaha la ansixiyay – daqliyadaha qofka.

- Heer-qarmeed noolasha [riksnorm] (ka aqriso barta internetka ee Hay`ada arrimaha bulshada [Socialstyrelsen]): Raashinka, dharka/kabaha, dhaqdhaqaaqa goobaha wakhtilummiska, nadaafad-shaqsiyeedka iyo kharashyada qoyska ay ka midaysan yihiin (waxyaalaha noolol-maalmeedka la isticmaalo, kharashyada taleefanka iyo wargeysyada maalinlaha ah).

- Kharashyadaha la ansixiyay: kharashyadaha lagamaarmaanka ah sida kirada guriga, korontada, caymiska guriga, dawooyinka iyo daryeel-caafimaadeedka dhakhtarka. Kharashyadaha oo idil ma ansaxsan iyo/ama waxay u baahan yihiin baaritaan dheeraad ah, sida tusaale kharashka hoyga ee dhallinyarada ee aan weli 25 sano buuxsan.

- Daqliyadaha /hantida qofka u gaarka ah, sida tusaale: Mushahar, Kaalmo-dhaqaaleedka ilmaha [barnbidrag], Kaalmo-dhaqaaleedka kirada [bostadsbidrag] iyo lacagaha akawntiga lagu soo shubay. Haddii aad hanti ma guurto leedahay, baabuur ama kayd-lacageed waa inaad marka hore iibisaa kuwaas, taasoo ku suurtagelin doonto inaad is-biisho.

## HEER-QARMEED NOOLASHA
## EE BIL KASTA 2025

**Kharash shaqsieed**

| | Aan weli 1 sano buuxsan | 1-2 sano | 3 sano | 4-6 sano | 7-10 sano | 11-14 sano | 15-18 sano | 19-20 sano | Kelinoole | Wadanool |
|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|
| Raashin cuntooyinka dhammaantood | 1655 | 1825 | 1820 | 2060 | 2290 | 2695 | 3045 | 3075 | 2690 | 4560 |
| dhar/ kabo | 310 | 420 | 450 | 480 | 550 | 620 | 730 | 730 | 550 | 1100 |
| Wakhtilummiska /cayaar-carruureed | 40 | 130 | 160 | 250 | 700 | 720 | 770 | 780 | 410 | 810 |
| Nadaafad-shaqsiyeed | 640 | 580 | 195 | 165 | 175 | 240 | 300 | 300 | 260 | 580 |
| Caymiska ilmaha iyo dhallinyarada | 75 | 75 | 75 | 75 | 75 | 75 | 75 | 75 | | |
| **Isku-darkii** | **2720** | **3030** | **2700** | **3030** | **3790** | **4350** | **4920** | **4960** | **3910** | **7050** |

**Kharash-wadareedka**

| | 1 qof | 2 qof | 3 qof | 4 qof | 5 qof | 6 qof | 7 qof |
|---|---|---|---|---|---|---|---|
| Waxyaalaha noolol-maalmeedka la isticmaalo, TV, taleefan | 1270 | 1400 | 1770 | 2010 | 2310 | 2620 | 2810 |

Haddii xubnaha qoyska ay ka badan yihiin 7 qof, waxaa qof kasta dartiisa lagu biirin karaa 190 kr.

## Talo-bixin ku saabsan miisaniyadda iyo daymaha

Haddii dhibaato ay ka haysato qaabka dhaqaalaha loo maamulo, waxaad talo-bixin ka heli kartaa la taliyeha arrimaha miisaniyadda iyo daymaha [Budget- och skuldrådgivningen] Talo-siinta waa lacag la`aan. Hawlwadeneyada arrimaha miisaniyadda iyo daymaha waxay tixgeliyaan waajibka xajinta sirta, mana diiwan geliyaan arrimaha qofka u gaarka ah.

Waxay ka caawini karaan:

- In Kala arrinsadaan dhaqaalahaaga.
- In qoyskaaga u dejiyaan miisaniyad u gaar ah.
- Ku siiyaan talo xiriir la leh daymaha lagugu leeyahay.
- Ku tusiyaan sida loo kala mudnaan siiyo harashyadaha.
- Qiimeeyaan fursadaha adiga ku gaarka ah ee lacagaha laysaga bixiyo.
- Sidii loo diyaargareeyo oona laga caawinno foomka lagu codsado ciribtirida daymaha [skuldsaneringsansökan].

Soo-dhawaaw toos noo soo wac kaddib qabso ballanka booqashada. Waxaad kaloo khadka taleefanka nalaga soo xiriiri kartaa talo-siin awgeed. Lambarrada waa [Budget- och skuldrådgivningen] degmada Hässleholm waa 0451-26 87 14 ama 0451-26 88 84.

**Haddii muddo hal bil ka badan aad taageero-dhaqaaleedka u baahan tahay** waxaa foomka ka soo qaadan kartaa miiska macaamiisha ee xafiiska Dowladda hoose ama ka soo degsan kartaa barta internetka ee Östra Göinge.

Markii aad codsanayso taageero-dhaqaaleed waxaa booqasho tixraacid awgeed ku yeeri doono gacan-hayaha ku qaabilsan.

## Fiican ogaanshaheeda

**Haddii aad ku talojirto inaad go`aan rafcaan ka qaadato**, warqad u soo qor Golaha Dowladda hoose. Ku soo qor go`aanka aad rafcaanka ka qaadanayso, sida ku soo qor taarikhda go´aanka la gaaray. Tan kale, ku soo qor sida aad doonayso in go'aanka wax looga beddelo.

Waa in saddex toddobaad gudahooda u Golaha Dowladda, soo gaara warqadda rafcaanka, tiriskaas oo laga soo bilaabo maalinta go`aanka lagu wargeliyay.

Golaha Dowladda hoose  wuxuu kaddib warqadda rafcaanka u gudbin doonaa maxkamadda arrimaha maamulka [Förvaltningsrätten] taasoo arrinta ka arrinsan doonto, waa haddii Golaha Dowladda hoose  usan waxba ka beddelin go`aankiisa.

Xitaa haddii codsiga laga diido, waxaad awooda in bisha ku xigta aad haddana codsato taageero-dhaqaaleedka.

**Xaaladaha qaarkood waxaa dhici karto in laga codsado dib u soo celinta taageero-dhaqaaleedkii lagu siiyay**. Sida tusaale haddii hay´ad kale ay goor dambe ku siiso lacag aad xaq u lahayd, ama haddii lacagta lagugu siiyay warbixin aan sax ahayn awgeed oo adiga laga helay.

**Qoraalka codsiga waxaad ku ballan qaadaysa in ay sax yihiin warbixinada aad soo gudbisay**. Waa inaad mar kasta gacanhayaha kala xiriirta haddii aadan garanayn sida foomka codsiga loo buuxiyo, ama haddii xaaladaada ay wax iska beddesho kaddib markii aad foomka soo dirtay. Waxaa dhici karto in dacwo lagugu soo oogo iyo inaad dib u bixiso lacagahii lagu siiyay haddii aad soo gudbiso warbixin been abuur ku salaysan ama qabyo ah.

Dhammaan hawlwadeneyada Waaxda taageero-dhaqaaleed waxay **tixgeliyaan xajinta sirta xirfadda,** sidaas awgeed arrintaada qof kale ugu ma sheekayn karaan haddii oggolaansho aynan ka haysan.

**Xeerarka** u hogaansan hawlgallada Dowladda hoose ee xiriirka la leh arrimaha Taageero-dhaqaaleed, waxaa kamid ah Xeerka Maamulka adeegga bulshada, Xeerka arrimaha guud iyo xajinta sirta xirfadda iyo  Xeerka arrimaha maamulidaha.

Haddii aad warbixin dheeraad ku saabsan taageero-dhaqaaleed u baahan tahay, waxaad ka aqrisan kartaa barta internetka Golaha arrimha abulshada [Socialstyrelsen], Dowladda hoose ee Östra Göinge ama la xiriir gacanhayahaaga.

Gacanhayahaaga waxaad kala xiriiri kartaa khadka taleefanka ama e-mail.

# Xasuus-qorka adiga ku gaarka ah

## Xasuus-qorka adiga ku gaarka ah

## Xasuus-qorka adiga ku gaarka ah

## Warbixin-shaqsiyeedkaaga sidatan ayaa loola dhaqmi doonaa

Hawlwadeneyada Waaxda taageero-dhaqaaleed, waxay warbixin-shaqsiyeedka adiga ku gaarka ah ula dhaqmi doonaan, qaab waafaqsan maamulida dhaqdhaqaaqa iyo sidii adiga lagu siin lahaa taageero iyo caawinaad. Qaabka aan ula dhaqmi doono warbixin-shaqsiyeedka adiga ku gaarka ah waa qaab waafaqsan Hab-maamuleedka sugidda warbixin-shaqsiyeedka [Dataskyddsförordningen]. Warbixin dheeraad waxaad ka aqrisan kartaa halkaan:

**https://www.ostragoinge.se/behandling-av-personuppgifter/**

Wixii su´aallo dheeraad ah waxaad kala xiriiri kartaa miiska adeegga shicibka ee Dowladda hoose ee wac: 044-775 60 00.

**Östra Göinge kommun**

www.ostragoinge.se | **044-775 60 00**